



Northern Light
HealthSM

Northern Light Mercy Hospital
144 State Street
Portland, ME 04101

Office 207.879.3000
Pre-Registration 207.879.3860

QAYBTA RAAJADDA MRI ISU DIYAARINTA RAAJADDA

- Wuxaan ubaahan tahay inaad su'aalo ka jawaabtid intaan raajadda lagu saarin, fadlan soo wac (207) 879-3622 si aad ugaga jawaabtid telefoonka su'alaahaas.
- Wuxaan kaa codsanaynaa inaad balanta timaadid rubuc saac ka hor, adoon dhar wax bir ama xadiid leh aan xidhnayn. Sidda wax yaalaha ay kamid yihiin kaatumo ama silisyo oo kale ama wax elektroonik ah, sidda telefoonka gacanta ama bayjar.
- Wuxaan kaa codsanaynaa oo kale inaad balanta usoo qaadid, haddii aad haysid waraaqo ama raajooyin hore oo ku saabsan arrinka hadda laguu saarayo raajadda.
- Raajooyinka qaar bay tahay ina qofka lagu mudo daawo khad ah (Intervenous contrast injection). Haddii aad sonkor leedahay ama qabtid cudurka beerka ee cagaarshow, ama ay da'daadu ka weyn tahay 60 sano, waa ina dhiig lagaa baadhaa marka hore. Fadlan balan ka samayso xafiiska dhakhtarkaaga. Ka bacdina waa inay noosoo gudbiyaan natijada balantaada raajadda ka hor.

Haddii aanad hubin inaad ubaahan tahay ku mudinta /duridda daawada khadka ah ee raajadda waadix ka dhigta (Intravenous contrast injection) fadlan lasoo xidhiidh qaybta MRI (207) 879-3622.

- **Caloosha qudha raajooyinka ku saabsan/MRCP MRI:** Waxba ha cunin ama cabin, laga bilaabo 12:00 habeynimo (saq dhexe).